

Martidii aan la casuumin

-Sheeko ka timid liraan

De ubudne gjestene

- En fortelling fra Iran





Beribaa waxaa jiray marwo duq ah taas oo ku noolayd guri cariish ah oo aad u yar oo ku yaalay tuulo yar oo ku taalay liraan. Gurigu wuxuu lahaa beer la eg sida sanduuq caro. Beerta gudaheeda waxaa ku yaalay geed la' eg taraq. Beerta waxaa ku wareegsanaa afar derbi oo dhoobo ka sameysan.

Det var en gang en gammel dame som bodde i et lite leirhus i en liten landsby i Iran. Huset hadde en hage like stor som en sandkasse. I hagen var det et tre like stor som en fyrstikk. Rundt hagen var det fire vegger av leire.



Galab ayey xijaabkeedii dheeraa oo ubaxeysnaa isku duuduubtay oo ay dibadda u baxday si ay deriska u soo salaanto. Markii uu xijaabkeedii bilaabay inuu hawada ku ruxmo sida xijaab aroosad, ayey si lama filaan ah u ogaatay in uu roob bilowday, urta dhoobadii qoyday ayaa ka timid derbiyada. Waxaa bilowday roob aad u xooggan iyo onkod.

En ettermiddag svøpte hun sin lange blomstrede chador rundt seg og gikk ut for å hilse på naboene. Idet chadoren begynte å svaie i lufta som et brudeslør, kjente hun plutselig at det begynte å regne, lukten av fuktig leire kom fra veggene. Det begynte å pøsregne og tordne.



Marwada waayeelka ahayd waxa ay u gurguuratay oo hoos gashay bustuhii. Markaas ayey si lama filaan ah u maqashay: «Dhag, dhag, dhag!»

Waa shimbir yar oo qoyey. Dhibco biyo ayaa ka soo dhacay sanqaroorkii shimbirta:

«Dhibic, dhibic, dhibic!»

Oo baalashii qoyanaa waa isku garaacmeen:

«Bac, bac, bac!»

Marwadii waayeelka ahayd ayaa shimbirtii qolka gelisay oo baalasha uga dabooshay maro yar.

Den gamla dama gikk inn og krøp under dyna. Da hørte hun plutselig: «Bank, bank, bank!» Det var liten klissvåt spurv. Vanndråper falt ned fra spurvens nebb: «Drypp, drypp, drypp!» Og de våte vingene flakset mot hverandre: «Klask, klask, klask!» Den gamle dama tok spurven med seg inn i rommet og dekket vingene med et lite tøyestykke.



«Dhag, dhag, dhag!»

Marwadii waayeelka ahayd ayaa albaabka u orday oo weydiisay: : «Waa kuma qofka albaabka garaacaya?»

Markii ay albaabka furtay ayaa tuke qoyani asaga oo duulaya soo galay gurigii oo biyo ku shubay shimbirtii.

Shimbirtii waxa ay doonaysay in ay canaanato tukihii, isla markaas ayey maqleen:

«Dhag, dhag, dhag!»

Mukulaal dhammaanteed qoyday ayaa iyada oo u socota si caajisnimo ah soo gashay gurigii.

«Bank, bank, bank!» Den gamle dama skyndet seg til døra og spurte: «Hvem er det som banker på?» I det hun åpnet døra fløy det ei klissvåt kråke inn i huset og dusjet spurven i vann.

Spurven skulle til å kjefte på kråka, med akkurat da hørte de: «Bank, bank, bank!» En gjennomvåt katt kom labbende inn i huset.



Markii shimbirkii iyo tukihi ay arkeen bisadii ayey aad isugu dhegeen oo ay bilaabeen in ay cabsi la giriiraan.

«Miyaaw, ha ka baqin kuwa aadan garanayn, gurigan gudihiisa dhammaanteen saaxiibo ayaan ku nahay,» Bisadii si xikmadeysan ayey u dhoola cadeysay.

Da spurven og kråka så katten, klenget de seg på hverandre og begynte å skjelve av redsel.

«Miau, ikke vær redd for de du ikke kjenner, i dette huset er vi alle venner,» smilte katten lurt.



Fiidkan inta lagu guda jiray marti badan oo qoyan ayaa timid:

Waxaa yimid eey waardiye ah iyo sac weyn oo guriga xoog ku soo galay oo sameeyey dhul gariir.

Xayawaankii oo dhan derbiga ayaa lagu tuuray.

Laakiin shimbirkii yaraa waa fadhiyey oo ka qoslay geeskiisii. «Hi-hi-hi-hi.»

I løpet av kvelden kom det flere våte gjester:

En vaktbikkje, og en stor ku som presset seg inn i huset og lagde jordskjelv. Alle dyrene ble slengt til veggs.

Men den lille spurven satt og lo i kroken sin: «Hi-hi-hi-hi.»



«S-s-s-s-s» Hadda qofku waxa uu kaliya gurigii yaraa dhexdiisa ka maqli karaa cod khuuro. Shimbirkii yaraa iyo mudane tuke wuxuu mid kasta boos ku lahaa meegaarka daaqadda, halka bisadii, eeygii waardiyaha ahaa iyo sicii weynaa uu mid kasta geestiisa ka deganaa qolka gudihiisa.

«Z-z-z-z-z» Nå kunne man bare høre lyden av snorking i det lille huset. Den lille spurven og herr kråke hadde funnet hver sin plass i vinduskarmen, mens kattepusen, vaktbikkja og den svære kua la seg i hvert sitt hjørne i rommet.



Maalintii ku xigtay, markii ay marwadii waayeelka ahayd isla kala bixisay oo indhaha kala furtay, waxa ay aragtay gurigii oo dhan oo dhaqaaqaya:

Tukihii wuxuu afka ku xirtay saddex geed oo la shito.

Eeygii waardiyaha ahaa waxa uu isticmaalay sambabadiisii xooganaa si uu hawo dabka ugu shido.

Bisadii waxa ay dusha maro ay saartay sagxadda dhulka ku diyaarisay quraac macaan.

Sicii waynaa magaalada ayuu aaday oo soo iibiyey rooti dhagax lagu dubay.

Oo shimbirkiina wuxuu ku heesay laxan wanaagsan.

Neste dag, da den gamle dama strakk seg og åpnet øynene, så hun at hele huset var i bevegelse: Kråka braste inn med tre vedkubber i nebbet. Vaktbikkja brukte de sterke lungene til å blåse liv i peisen. Katten gjorde i stand en lekker frokost på en duk på gulvet. Den store kua hadde vært i byen og kjøpt steinbakt brød. Og spurven sang en vakker melodi.



Dhammaan si wareeg ah ayey ugu fariisteen maradii quraacda ee dhulka taalay, waxa ay ku cuneen rootiga dhagaxa lagu dubbay farmaajo cad, waxa ay cabeen shaah oo si fiican ayey u baashaaleen.

Markii ay cabeen dhibicdii ugu dambeysay ee shaaha, ayey bilowday qoraxdii in ay soo iftiinto. Hadda roob ma da'ayo, hadaba laga yaabee in ay tahay waqtigii la tegi lahaa.

Laakiin fikirka ah in la macsalaameeyo marwadan waayeelka ah ee wanaagsan ayaa iyagii murugo weyn ku abuurtay.

Alle satte seg rundt frokostduken på bakken, spiste steinbakt brød med fetaost, drakk te og storkoste seg.

Da de hadde tatt den siste slurken med te, begynte sola å skinne. Nå regnet det ikke lenger, så det var vel kanskje på tide å dra. Men tanken på å ta farvel med den gamle snille damen gjorde dem veldig triste.



Iyada oo qalbigu murugoonayo ayey marwadii waayeelka ahayd fiirisay dhammaan xayawaankii oo ay tiri:

«Haddii arinta anniga la ii dhaafi lahaa, waa idiin ogolaan lahaa in dhammaantiin mar kale ila joogtaan, laakiin beertayda waxa ay u weyn tahay sida sanduuqa carada, iyadu wax badan ma qaado. Haddii shimbirkan yari uu sii joogo, waxa ay lama huraan u noqonaysaa in sacani uu tago.»

«Ka waran aniga oo dhaha macaa-macaa, waxaan ku siiyaa caano iyo subag aad marsato rootiga-rootiga, ma sii joogi karo miyaa?» ayuu yiri sicii waynaa. «Miyaaw- miyaaw- miyaaw ...» ayey tiri bisadii.

«Ka waran aniga oo dhaha wuff- wuff, garaaca tuugada, anigu waa adkahay- adkahay, ma sii joogi karo miyaa?» ayuu yiri eeygii waardiyaha ahaa. «Kara-kara-kara ...» ayuu yiri tukihii.

«Oo ka waran aniga oo dhaha tafi- tafi, dadka oo dhan waxa ay u baahan yihiin laxan, ma sii joogi karo miyaa?»

Med en klump i hjertet så den gamle dama på alle dyrene og sa: «Hvis det var opp til meg, så skulle jeg latt dere alle bli igjen, men hagen min er like stor som en sandkasse, dem rommer ikke så mye. Hvis den lille spurv blir igjen, blir den svære kua nødt til å gå.» «Og hva med meg som sier mø-mø, gir deg melk og smør til brød-brød, skal ikke jeg få bli?» sa den svære kua. «Mjau-maju- maju ...» sa katten. «Hva med meg som sier woff- woff, banker tyver, jeg er røff-røff, skal ikke jeg få bli?» sa vaktbikkja. «Kra-kra-kra ...» sa kråka. «Hva med meg som sier tvi-tvi, alle trenger en melodi, skal ikke jeg få bli?»



Oo sidaa ayaa dhammaan loogu ogolaaday in ay sii joogaan, laakiin hal shardi ayaa ku xiran:

Dhammaan waa in shaqada guriga ka qeyb qaataan, oo ay isku fiicnaadaan.

Sidaa ayey sameeyeen oo laga soo bilaabo xilligaas si wadajir ah ayey sannado badan oo farxadi ku dheehan tahay ku noolaayeen.

Halkaas ayey sheekadii ku dhammaatay.

Og det var slik alle fikk lov til å bli, men på en betingelse: Alle skulle hjelpe til med huset, og være snille med hverandre. Det gjorde de og fra da av levde de mange lykkelige år sammen.

Snipp, snapp, snute, så er eventyret ute.



Illustratør: Svetlana Voronkova

Se flere fortellinger på morsmal.no